

## **Halkee ayaan u raadsadaa macluumaaad badan?**


La xiriir xafiiska Xiriirada Nolosha Bulshada/xafiiska Hay'adda Degaanka ee Gabowga ee degaankaaga – waxaad ka heli kartaa goobaha iyo telefoon lambarada mareegtada [www.waclc.org](http://www.waclc.org) hoosta qeypta Xiriirkha ama wac telefoonka bilaashka lagu waco ee 1-855-567-0252.

Ama booqo [www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/caregiver-resources](http://www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/caregiver-resources) si aad u hesho macluumaaad badan oo ku saabsan barnaamijyadan iyo khayraadyada kale ee daryelaha.

*Adeegyo iyo taageero  
xaddidan oo wakhtii  
go'an la bixiyo  
ee loogu talogalay  
shakhsiyadka iyo  
daryeelayaashooda  
waxaa ay ku  
caawinayaan dadka  
in ay ugu noolaadaan  
nolol madax-bannaan,  
caafimaadqab leh  
guryahooda.*

## **Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid ivo Taageerada Habboon ee loogu talogaley Dadka Waaweynka ah**

*Daryeelayaasha aan lacagta qaadan waa lafdhabarka adeegyada iyo taageerada aan bixinno muddada dheer. Adeegyadan waxaa loogu talogaley in ay ku caawiyaan daryeelayaasha aan lacagta qaadan in ay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ayu sii bixiyaan daryeel tayo sare leh iyo in ay xoogga saaraan caafimaadkooda iyo ladnaantooda.*



Gobolka Washington waxaa uu bixinaya laba siyaabood oo dheeraad ah oo lagu taageerayo dadka waaweyn ee u baahan caawimo si ay guriga ugu noolaadaan. Barnaamijyadan, ee hoos lagu sharxey, waxaa ay taageeraan daryeelayaashooda qoyska ee aan lacagta qaadan ama waxaa ay taageeraan shakhsiyadka aan hadda haysan daryeelle aan lacag qaadan. Xafiiska Xiriirada Noloshada Bulshada ama xafiiska Hay'adda Degaanka ee Gabowga ee degaankaaga waxaa ay bixin karaan maclumaadka dheeraadka ah ama waxaad maclumaad ka heli kartaa online-ka.

## Waa maxay waxa ay bixiyaan barnaamijyadan?

Labada barnaamij waxaa ay bixiyaan adeegyo iyo taageero kala duwan ee aad xaq u yeelan karto, oo ay ka mid yihiin:

- Maamulka hawl-guriyedka iyo adeegyada gaagaaban
- Fursado tababar
- Kooxo taaageero iyo la-talin
- Qalabka ama sahay caafimaad oo gaarka ah
- Maclumaadka ku sabsaan daryeel bixinta, kharyaadka bulshadaada, adeegyada la heli karo iyo waxyaboo badan.
- Caafimaad Maalintii ee Dadka Waaweyn ama Daryelka Maalinta ah ee Dadka Waaweyn
- Ikhtiyaarada goobaha sida ku mealgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka



Hoosta **Taageerada Habboon ee loogu talogaley Dadka Waaweyn**, adeegyada gargaarka shakhsi ahaaneed (oo ay ka mid yihiin daryelka shakhsi iyo kalkalisada) waa ikhtiyaar dheeraad ah, beddelki goobaha sida ku mealgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka, ee loogu talogaley dadka waaweyn ee aan haysan daryeelle, ee jira da'da 55 ama ka weyn, kuwaas oo ka soo baxa shuruudaha shaqada iyo maaliyadda.

Qofkee	Magaca Barnaamijka	Shuruudaha Da'da	Shuruudaha Medicaid	Shuruudaha Kale	Heerka Dheeftha
<b>Daryeeleyaasha</b>	Daryelka Beddelka ah ee Medicaid (MAC)	Qofka daryelka helaya waa in uu jiro 55+ daryeelahana waa in uu jiro da'da 18+.	Waxaa ay u baahan tahay in daryeel qaataha uu hadda ku jiro Apple Health (Medicaid).	Qofka daryelka helaya waa in uu kaalmo ugu baahan yahay hawlaha qaar ee nolol maalmeedka, sida qubeyska, socodka, daawooyinka, wareejinta, iwm.	Ayada oo ay ku tiirsantahay xaaladaada, waxaad qaadan kartaa mid kamid ah seddex heerar oo kaladuwaa oo adeego iyo taageero ah.
<b>Daryeeleyaasha ama Dadka Waaweyn ee aan haysan Daryeelle</b>	Taageerada Habboon ee Dadka Waaweyn (TSOA)	Qofka daryelka helaya waa in uu jiro 55+ daryealahana waa in uu jiro da'da 18+.	Xaq u yeelashada Medicaid shuruud ma ahan. Dakhligaaga iyo ilooyinkaaga dhaqaale waxay noqon karaan kuwo ka baddan tirada Medicaid. Shaqaale ayaa kugu caawin doona go'aansashada u qalmitaankaaga dhaqaale.	Qofka daryelka helaya waa in uu kaalmo ugu baahan yahay hawlaha qaar ee nolol maalmeedka, sida qubeyska, socodka, daawooyinka, wareejinta, iwm.	Ayada oo ay ku tiirsantahay xaaladaada, waxaad qaadan kartaa mid kamid ah seddex heerar oo kaladuwaa oo adeego iyo taageero ah.